
# Ku saabsan Nidaamka Waxbarashada Ingiriisiga: Dugsiyada Hoose

Tilmaamo loogu talagalay waalidiinta dhalay carruurta oo luuqada Ingiriisiga u isticmaala Luuqad Dheeraad ah ahaan (EAL)




## Tilmaamahan maxay ka kooban yihiin?

Halkan waxaad ka heli kartaa macluumaad wax ku ool ah oo kaa caawinaaya inaad boos iskuule.ed u hesho ilmahaaga ah iyo inaad fahamto Nidaamka Waxbarashada Ingiriisiga.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo iskuulo ah oo kuyaala England, oo ay kujiraan kuwa waalidiinta ay tahay inay lacag ku bixiyaan (tusaale (i.e.*ahaan iskuulo lacag lagu bixiyo/ iskuulada madaxa banaan/kuwa gaarka loo leeyahay*).

Tilmaamahan waxay wax kaaga sheegayaan iskuulada Ingiriisiga ee aadan lacag ku bixinaynin (tusaale ahaan *iskuulada gobolka*). Waxaa jira noocyo kala duwan oo iskuulada gobolka ah, oo ay ka mid yihiin:

- *Iskuullada Maamulka Deegaanka* (LA) - oo ay maalgeliso dawladda hoose
- *Dugsiyada tacliinta* iyo *Iskuulada Bilaashka ah* - oo ay maalgeliso dowladda dhexe, inta badan qeyb ka ah Hay'ad
- *Iskuullada diinta* - oo ku xiran diin gaar ah

Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad ilmahaaga wax ku barto guriga, ha ahaato wakhti buuxa ama wakhti dhiman. Tani waxaa lagu magacaabaa waxbarashada guriga (ama *waxbarashada guriga ee la doorto* ama *iskuulka ka dhigida guriga*). Wax badan ka ogoow halkaan: **https://www.gov.uk/home-education**




## 1. Sideen ilmahayga ugu heli karaa boos iskuul?

La xiriir golaha *deegaankaaga* (sidoo kale *loo yaqaan Maamulka Deegaanka* ama *LA*) so aadilmahaaga ugu hesho boos dugsi maxaa yeelay:

- Golaha *deegaanku* waa inuu boos dugsi uga helaa ilmahaaga agagaaraha haddii ilmahaagu da'a ahaan jiro 5 ilaa 16 sano
- Waxaad halkaan ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan iskuulka: **https://www.gov.uk/schools-admissions**

**Halkaan waxaa ku qoran fikrado kaa caawinaya inaad go'aansato dugsiga aad jeceshahay:**

- Booqo dugsiga inta lagu jiro fiidadka uu furan yahay
- Eeg webseetka iskuulka
- Akhriso warbixintooda ugu dambeysay ee kormeerka Ofsted: **https://reports.ofsted.gov.uk/**
- Hubi waxqabadka guud ee dugsiga: **https://www.compare-school-performance.service.gov.uk/**
- Kala hadal waalidiinta kale si aad u ogaato waxa ay ka aaminsan yihiin dugsiga

**Markaad ogaato dugsiyada aad jeceshahay, waxaad u baahan doontaa inaad:**

- Buuxiso foomka codsiga ee khadka tooska ah, adigoo sheegaya dhowr dugsi oo aad jeceshahay
- Ku dKu dar*aagga lagaa helo* si aad u codsato dugsiga hoose
- Weydiiso caawinaad *Kooxda Ogolaanshaha Dugsiyada* ee golaha deegaankaaga (CB2) maadaama hanaanka codsiga dugsiga uu noqon karo mid adag
- Weydii golaha haddii ay jiraan dad kale, kooxo bulsho ama tarjumaanno ku caawin kara

## 2. Da'dee ayuu ilmahaygu ku bilaabi doonaa dugsiga?

Dhammaan carruurta ku nool England waa inay bilaabaan waxbarasho waqti-buuxa ah wixii ka dambeeya sanadkadhalashadooda shanaad. Si kastaba ha noqotee, carruurta badankood waxay ku biiraan fasalka soo dhoweynta markay tahay bisha Sebtember kadib markay gaaraan afar sano.

La xiriir Maamulka Deegaankaaga ama dugsiga si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan goorta uu ilmahaagu bilaabayo dugsiga.

## 3. Sideen kugaadaa teeramka dugsiga iyo taariikhaha fasaxa?

Waqtiga dugsiga iyo taariikhaha fasaxu way ku kala duwan yihiin iskuulada England.

La hadal dugsiga siaad u ogaato taariikhaha ama ka fiiri webseetkaan: **https://www.gov.uk/school-term-holiday-dates**

 Xuquuqda daabacaadda © Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeyneysa The Bell Foundation ahaan) Oktoobar 2020

## 4. Maxaan ka filan karaa dugsiga?

Akhriso *Dukumentiga Sharxaya Hawlaha Dugsiga* ama *Buugga Soo Dhaweynta* ee loogu talaglay waalidiinta cusub oo booqo webseetka; weydiiso iskuulka wixii caawimaad ah si laguugu turjumo macluumaadka haddii aad u baahato.

### Ilmahaaga, waxaa u jiri doona:

- Hawlaha soo dhoweynta si looga caawiyo ilmahaagu inuu la qabsado iskuulka
- Meel ka mid ah fasalka oo qiyaastii 30 arday oo ay isku da'a yihiin ku jiraan
- Jadwal joogto ah oo casharro uu isla hal macalin bixiyo
- Casharrada qaar (tusaale, Waxbarashada Jirdhiska (PE) iyo muusikada) oo ay suuragal tahay inuu baro macallin takhasus leh
- Isticmaalka manhaj buuxa – eeg hoos si aad u hesho macluumaad dheeraad ah
- Shaqada guriga oo ku xidhan waxbarashada fasalka
- Hab loo wada dhan yahay oo dhammaan carruurta loola dhaqmo si caddaalad ah

### Maxaa kale ayuu ilmahaygu ku sameyn doonaa iskuulka?

Ilmahaagu wuxuu awood u yeelan doonaa inuu ka qaybqaato nashaadaadka manhajka dheeraadka ah, safarada iskuulka iyo munaasabadaha kale, oo ay ku jiraan:

- *Shirarka* iyo fursadaha cibaado *wadareedka*
- *Hawlaha manhajka ka baxsan* iyo *naadiyada*, tusaale ahaan, isboortiska, muusikada iyo riwaayadaha
- *Safarada iskuulku* oo loo aado meelaha xiisaha/tiyaatarada/munaasabadaha isboortiga
- *Kulamada fasalada* iyo *wax soosaarka* si loo daawado bandhigyada carruurta
- *Munaasabadaha bulshada* iyo *munaasabadaha lacag aruurinta* sida *isboortiga, bandhigyada* xagaaga iyo kirismaska, *diskoska*, *iyo halxiraalaha*



### Sideen ku ogaan doonaa waxa ka dhacaya iskuulka?

Iskuulkaagu si joogto ah ayuu kula soo xiriiri doonaa si aad u oggaato waxa ka dhacaaya fasalka ilmahaaga. Iskuulku waxay isticmaali doonaan noocyo isgaarsiineed oo kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- *Webseetka Iskuulka*: taariikhaha muhiimka ah, macluumaadka iyo ogeysiisyada
- *Ogeysiisyada*: fariimaha qoraalka ah, baraha bulshada (tusaale. Twitter) iyo ablikeeshinada
- *System-yada khadka tooska ah: cuntooyinka iskuulka* iyo *ballamada fiidka ee* waalidiinta
- *Iimayl* iyo *warqadaha*: macluumaadka iskuulka, fasalka iyo fasaxa
- *Wargeysyada* iyo *warbixinada*: waalidiinta, shirar iyo warbixinno fool-ka-fool ah
- *Kulamada* iyo *wargaysyada macluumaadka*: ku saabsan nolosha iskuulka iyo maadooyinka
- *Xiriir toos ah*: wadahadal qof-ka-qof ah oo taleefan ah ama iimayl ah Raadi macluumaad dheeri ah adigoo lahadlaya waalidiinta kale ee jooga goobta ciyaarta



## 5. Muxuu iskuulku iga filayaa?

**Waalid ahaan, waxaa lagaa filayaa inaad:**





- U dirto ilmahaaga iskuulka maalin kasta iyo wakhtigii loogu talagalay, marka laga reebo haddii ay jiran yihiin, ballan ay leeyihiin ama ay tahay cibaado diineed. Faahfaahin ka hel *gaadiidka iskuulka bilaashka ah* ee golaha deegaankaaga halkaan:
  **https://www.gov.uk/free-school-transport**
- La xiriito dugsiga si aad ugu sheegtid sababta ilmahaagu uga maqanyahay. Hore usheegtid iskuulka hadaad awoodo.
- Carruurtaada u kaxeeysid fasaxyada xilliyada fasaxyada iskuulka oo keliya. Haddii aad go'aansato inaad carruurtaada u kaxeyso fasax inta lagu jiro muddada teeramka, waxaa laga yaabaa inaad bixiso ganaax. La hadal dugsiga siaad wax badan uga ogaato ama ka fiiri webseetka: **https://www.gov.uk/school-attendance-absence**
- U sheegtid dugsiga wixii ku saabsan munaasabadaha ama xaaladaha muhiimka u ah ilmahaaga ama qoyskaaga. Waxay isku dayi doonaan intii karaankooda ah inay ku taageeraan.
- Bixiso *faahfaahinta* caafimaadka *iyo faahfaahinta* xariirka.
- Buuxi *Foomka* oggolaanshaha si aad u cadeeyso in ilmahaagu uu tegi karo safarrada dugsiga, sawirro laga qaadi karo iwm.



## 6. Dadka sidey ku kala yihiin iskuulka?



Eeg *Dukumentiga Dugsiga ee Sharxaya Ujeedka Iskuulka* ama webseetka dugsiga si aad u aragto sawirrada iyo magacyada xubnaha shaqaalaha; mararka qaarkood kuwan ayaa lagu soo bandhigaa iridda dugsiga sidoo kale.

Weydii dugsiga, qofka ka mid ah xubnaha shaqaalaha ee la shaqeyn doona ilmahaaga. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara:



- *Hogaamiyaasha Sare* – sida, Madaxa Macallimiinta, ku xigeenka Madaxa Macallimiinta
- *ShaqaalahaXafiiska* – tusaale, shaqaalaha soo dhaweynta dugsiga
- *Shaqaalaha Waxbarashada* –sida, Macallinka Fasalka iyo Kaaliyaha Waxbarista
- *Shaqaalaha Waxbarashada Guriga* –sida Sarkaalka WaxbarashadaGuriga
- *Shaqaalaha Takhasuska leh* –sida. Macallimiinta EAL (Ingiriisiga oo ah Luuqad Dheeraad ah), SENDCo (Isuduwaha Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah iyo Naafada), Macallinka Hoggaaminaya Ilaalinta Carruurta (DSL)


Xuquuqda daabacaadda © Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeyneysa The Bell Foundation ahaan) Oktoobar 2020

## 7. Maxaa la isku baraa oo la iskugu imtixaanaa iskuulka?

Fadlan eeg jadwalka hoose siaad u ogaato *Qeybta*, *Heerka* iyo *Sannadka Kooxda* uu ilmahaagu geli doono – iyo *Qiimeynta/Tijaabooyinka/Imtixaannada* ay qaadan doonaan:

| Qeybta | Heerka/ Isteejka | Kooxda Sanadka | Xadka Da'ada | Qiimeynta/Tijaabooyinka/ Imtixaanaadka | Maadooyinka la barto |
|---|---|---|---|---|---|
| Hoose | Marxaladda Aasaasiga ah ee Sannadaha Hore (EYFS) | Sanadka Soo Dhaweynta | 4-5 | Dhammaadka Soo Dhaweynta: Borofaylka EYFSwaa la dhammaystiray | Hadalka iyo luuqadda, horumarka jireed, horumarka shaqsiyeed, horumarka bulshada iyo shucuurta, akhris-qorista, xisaabta, fahamka adduunka, muujinta farshaxanka iyo qaabeynta |
| | Marxalada Muhiimka ah ee 1 aad | Sanadka 1aad<br><br>Sanadka 2 aad | 5-6<br><br>6-7 | Dhamaadka Sanadka 1 aad: Imtixaanka codadka alifbeetada hubin<br><br>Dhammaadka Sanadka 2 aad: Marxalada Muhiimka ah ee 1 aad Imtixaanada SAT-yada | Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, naqshad iyo teknoolajiyada (DT), taariikhda, juqraafiga, farshaxan iyo naqshad, muusig, waxbarashada jimicsiga (PE, dabaasha oo ay ku jiraan), kumbiyuutar barashada |
| | Marxalada Muhiimka ah ee 2 aad | Sanadka 3 aad<br>Sanadka 4 aad<br>Sanadka 5 aad<br>Sanadka 6 aad | 7-8<br>8-9<br>9-10<br>10-11 | Sanadada 3-5 aad:<br>Waxbarashada joogtada ah imtixaanada<br><br>Dhammaadka Sanadka 6 aad:<br>Marxalada Muhiimka ah ee 2 aad Imtixaanada SAT-yada | Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, nashadeynta iyo teknoolajiyada (DT), taariikhda, juqraafiga, farshaxan iyo naqshad, muusig, waxbarashada jimicsiga (PE, dabaasha oo ay ku jiraan), xisaabinta, luuqadaha qalaad ee qadiimiga ah iyo kuwa casriga ah |

Macluumaad dheeraad ah ka hel **https://www.gov.uk/national-curriculum**

## 8. Muxuu ilmahaygu u baahan doonaa?



**Weydii dugsiga ilmahaaga haddii ay jiraan yunifoomka dugsiga iyo meesha laga soo iibsado.**

- Dugsiyo badan oo England ku yaal ayaa la filayaa carruurtu inay xidhaan yunifoomka dugsiga laakiin qaarna ma sameeyaan sidaas.
- Dugsiga ilmahaaga ayaa ku siin doona liistada waxa aad iibsanayso oo kuu sheegi doona halka aad ka soo iibsan karto; weydii su'aalo ku saabsan agabyada PE iyo alaabta dabaasha sidoo kale.
- Haddii ay dhibaato dhaqaale ku haysato, kala hadal dugsigaaga maadaama laga yaabo inay ku caawin karaan.

**Weydii dugsigaaga su'aalaha ku saabsan qalabka wax lagu barto, oo ay ka mid noqon karaan:**



- Boorsada buugaagta lagu rido, casharrada guriga lagu soo akhriyo iyo waraaqaha dugsiga laga soo diro.
- Shandad loogu talagalay qalabka PE, oo qadada la qaato iyo qalabyada kale.
- Qalabka lagu rito qalimada, tusaale ahaan. qalimaanta, qalin qori iwm.
- Kalkulaytar iyo qalabyada kale ee xisaabta.

**Weydii dugsigaaga su'aalaha ku saabsan xulashooyinka cunnooyinka qadada ee loogu talagalay ilmahaaga, oo ay ka mid yihiin:**



- Cunto *iskuul* - marmar waxaa loo yaqaan qadada iskuulka ama casho
- *Qadada guriga laga keensado* –waxaa laga keensadaa guriga
- *Qadada guriga* - guri oo loo aado qado

**Weydii liiska cuntada *iskuulka* , qiimaha iyo sida loo bixiyo, maxaa yeelay:**

- Iskuulku wuxuu kaa caawin karaa baahiyaha cuntada gaarka ah, tusaale ahaan. Cuntooyinka xalaasha ah.
- Carruurta ku jira sanadka soo dhaweynta, Sannadka 1aad iyo Sannadka 2aad waxay helaan *Cunto Iskuul oo Bilaash ah.*
- Carruurta kale waxay sidoo kale heli karaan *Cuntada Dugsiga ee Bilaashka ah (FSM)* haddii qoyska ay ku jiraan barnaamijyada qaar ee gunnooyinka leh. Waxaad wax badan kaga ogaan kartaa halkaan: **https://www.gov.uk/apply-free-school-meals**

## 9. Waa maxay taageerada dheeraadka ah ee ay heli karaan ardayda u baahan?



- *Caawinta arrimaha iskuulka la xiriira*: in laga caawiyo wixii welwel ah ee ku aadan iskuulka ama guriga
- *Hogaanka Ilaalinta Carruurta*: si lagaaga caawiyo cabashooyinka halista ah
- *Taageerada Luuqadda Ingiriisiga (EAL):* si lagaaga caawiyo barashada Ingiriisiga ee fasalka dhexdiisa ah
- *Taageerada waxbarashada*: haddii ilmahaagu uu qabo *Baahiyaha Waxbarashada ee Gaarka ah* ama*Naafonimo*
- *Hay'adaha dibedda*: khabiiro ku takhasusay inay ka caawiyaan dugsiga taakuleynta carruurta

## 10. Sideen ilmahayga uga caawin karaa inuu waxbarto?

Ka ogoow sida loo caawiyo ilmahaaga inuu waxbarto **halkaan**.


Xuquuqda daabacaadda © Bell Educational Trust Limited (oo u shaqeyneysa The Bell Foundation ahaan) Oktoobar 2020